



Department of Assessments
KSC-AS-0708
201 South Jackson St.
Seattle, WA 98104-3854
206-296-3920

**Dadka Waayeelka ah iyo Dadka Naafada qaba
Senior Citizen and People with Disabilities
Yaraynta Cashuurta Dhismaha
Reduction in Property Taxes**

Codsiga Ugudbi Qiimeyaha Degmada King County si waafaqsan RCW 84,36
File Application with the King County Assessor per RCW 84.36

Cashuurta Dhismaha La filayo _____
For Property taxes Due in

Dakhliga sanadka (sanadkii hore): _____
Income year (prior year)

1- Nooce Heerka Isbeddelka (sax dhammaan inta ku habboon):

Status Change Type (check all that apply):

- Dhakhli Badan Over Income
- Isbeddelka Dakhliga Change in income
- Heerka guurka Marital status
- Lahaanshaha Ownership
- Shaqada Occupancy
- U wareejinta xaaska Hadhay/lamaanaha guriga Transfer to Surviving spouse/domestic partner

2- Macluumaadka Codsadaha: Applicant Information:

Magaca codsadaha

Applicant name: _____

*Koowaad
First*

*Dhexe
Middle*

*Dambe
Last*

Taariikhda Dhalashada:

Date of Birth: _____

Sayga/Xaaska/Lamaanaha Guriga/Kula-Kireystaha guriga

Spouse/domestic partner/Co-tenant: _____

Dhalashada:

Date of Birth: _____

Fadlan goobo geli mid ka mid ah doorashooyinka. ⓘ Kula kiraystaha = qof cid la leh guriga oo ku nool dhismaha

Please circle one of the options. ⓘ Co-tenant = co-owner who lives on property

Waxaan ahay: (sax bogoska ku habboon): I am: (check appropriate box):

Xaas ah Married Qof aan xaas lahayn Single Laga dhintay Widowed

La furay/Si sharci ah ukala maqan Divorced/Legally separated

Maaha 61 waxaan ahay xaaska hadhay/lamaanaha guriga ee qofka hore u heli jiray ka reebidan oo waxaan ahaa ugu yaraan 57 sanadood jir sanadka xaaskayga/lamaahayga gurigu ay dhimatay

Not 61 but I am a surviving spouse/domestic partner of a person who was previously receiving this exemption and I was at least 57 years of age in the year my spouse/domestic partner passed away

Xidhmada ama Lambarka Kootada Cashuurta Dhismaha _____

Parcel or Property Tax Account Number _____

Cinwaanka guriga Physical address: _____

Magaalada City: _____ Sibka Zip: _____

Cinwaanka boostada (haddii u ka duwanyahay cinwaanka guriga): _____

Mailing address (if different than physical address)

Magaalada City: _____ Gobalka State: _____ Sibka Zip: _____

Telefoonka guriga Home phone: _____ Telefoonka gacanta Cell phone: _____

Iimaylka Email: _____

3- Lahaanshaha iyo Deganaanshaha Guriga (sax dhammaan inta adiga kugu habboon):

Property Ownership and Occupancy (check the options that apply to you):

- Waxaan ahay qofka iska leh guriga I am the owner
- Waxaan haystaa heshiiska kirada guriga I hold a lease for life
- Waxaan u haystaa mulkiyada nolosha oo dhan dhismahan I hold a life estate for this residence
- Dhismahu waxa uu ku jiraa maga Mulkiyadeed Property is in name of a Trust
- In dheeraad ah ma lihi dhismaha sare lagu tixraacay I no longer own the property referenced above
- Dadka la leh guriga waa laga saaray/waa la beddelay Co-owners were removed/changed
- Weli waxaan leeyahay dhismaha sare lagu tixraacay, laakiin in dheeraad ah kuma noolo dhismaha sababtoo ah:
I still own the property referenced above, but I no longer live at the property because:

Wakhtiga dhismaha la iibsaday: Date property purchased: _____

Taariikhda dhismaha markii koowaad la degay: Date property initially occupied: _____

Waxaan deegaanka degay: I occupied the residence:

- In ka badan 6 bilood sanadkii la soo dhaafay. More than 6 months last year.
- In ka yar 6 bilood sanadkii la soo dhaafay. Less than 6 months last year.

4- Dakhliga soo Hadha (CDI) heerkii waa: (sax doorashada(ooyinka) adiga kugu habboon)

Combined Disposable Income (CDI) range is: (check the option(s) that apply to you)

- \$72 001 - \$84 000
- \$60 001 - \$72 000
- Gaadhaya ama ka yar \$60,000
At or below \$60,000

- Ka badan \$84 000
Over \$84,000

- Waxaan helay **hal wakhti** lacag bixinta iga saraysiisay xadka dakhliga (\$84,000), oo waxay ahayd:

I received a **one-time** disbursement which put me over the income limit (\$84,000), and it was:

- Dhaxal/dheefta dhimashada ee \$ _____
An inheritance/death benefit for _____
- Kale (nooca iyo qadarka) _____
Other (type and amount)

Iyaddoon lahayn mida sare lagu sheegay **hal wakhti** lacag bixinta CDI gaygu waa: **(Ka bood**

haddii aanay habboonayn)

Without the above-mentioned **one-time** disbursement my CDI is: **(Skip if not applicable)**

- \$72 001 - \$84 000
- \$60 001 - \$72 000
- Gaadhaya ama ka yar \$60,000
At or below \$60,000

- Aniga, oo hoos ku saxeexan, waxaan ku kalsoonahay dakhliga iyo qadarka kharashka lagaga warbixiyay codsigan.
I, the undersigned, am confident in the income and expense amounts reported on this application.
- Aniga, oo hoos ku saxeexan, waxaan doorbidayaa habeeyahu inuu dib u eego dakhligayga laga warbixiyay iyo kharashyada ku jira codsiga. Dhokumentiga taageerayaa way lifaaqan yihiin.
I, the undersigned, would prefer a processor to review my reported income and expenses on this application.
Supporting documents attached.

5- Dakhliga (Dakhliga Soo hadha – ISTICMAAL SANADKA DAKHLIGA SANADKII HORE)

Income (Combined Disposable – USE THE YEAR PREVIOUS YEAR'S INCOME)



Haddii aanad samaynayn dakhli, fadlan bixi caddaynta muujinaysa sida aad u bixiso kharashkaaga maalinlaha ah, ay ku jiraan laakiin kuma xadidna Janaayo ilaa Diisambar warbixinaha baanka.

If you are not making an income, please provide documentation showing how you pay for daily expenses, including but not limited to January through December bank statements.

Ma lagaaga baahan yahay inaad soo gudbisoo foomka cashuurta federaalka? Haa Yes Maya No

Are you required to file a federal income tax form?

Qaybta I - Dakhliga Part I - Income	Dakhliga sanadkii hore Previous year Income	Qaybta 2 - Ka-jaritaanada Part 2 - Deductions	La bixiyay sanadkii hore Paid in previous year
1. Mushaharada la shaqaystay, mushaharka, bakhsiiska Earned wages, salaries, tips	\$	17. Guriga kalkaaliska, nolosha la taakuleeyo ama guriga qoyska qofka wayn Nursing home, assisted living or adult family home	\$
2. Amniga Bulshadda oo Go'an Net Social Security	\$	18. Daryeelka caafimaadka guriga Home health care	\$
3. Naafanimada Dakhliga Disability Income	\$	19. Dawo qorida Prescription drugs	\$
4. Hawlgabka, Lacagta Hawlgabka, Dakhligaga Dakhliga Caymiska qadaraaska Retirement, Pension, Annuity income	\$	20. Medicare qaybaha A, B, C, D qadarada caymiska Medicare parts A, B, C, D insurance premiums	\$
5. IRA (Qadarka La cashuuri karo) IRA (Taxable Amount)	\$	21. Dheefta Medicare/kaabida/qadarka caymiska Medigap Medicare advantage/supplemental/Medigap insurance premiums	\$
6. Magdhowga Shaqo la'aanta Unemployment Compensation	\$	22. Qalabka adkaysiga leh iyo dhaqaaqa sare u qaadaya iyo qalabyada lagu taageero cagta Durable medical and mobility enhancing equipment and prosthetic devices	\$
7. Dulsaarka Laga Qaado Canshuurta & Kan aan Laga Qaadin iyo/ama Macaash qaybsiga Taxable & Non-Taxable Interest and/or Dividends	\$	23. Ogsajiinta caafimaad ahaan la qoray Medically prescribed oxygen	\$
8. Dakhliga ganacsiga ka hor qiime dhaca Business Income before depreciation	\$	24. Caymiska Daryeelka Wakhtiga dheer Long-term care insurance	\$
9. Wadarta Guud ee Raasumaalka. HAKA jarin khasaaraha. Total Capital Gains. DO NOT deduct losses.	\$	25. Qadarada wadaaga kharashka Cost-sharing amounts	\$
10. Dakhliga kirada ka hor qiime dhaca Rental Income before depreciation	\$	26. Qalabka dawada la isku buufiyo ku jirto Nebulizers	\$
11. Sanduuqa, Shuraakada, Dakhliga laga helo Dhisme ama Alaab Trust, Partnership, Estate or Royalty Income	\$	27. Dawooyinka macdanta ah, xawayaanka iyo asalka dhirta ah kuwa ah ee la qoray, la maamulay, lagu bixiyay nidaamka aan dawada ahayn ee waafaqsan sharciga Washington Medicines of mineral, animal and botanical origin prescribed, administered, dispensed by	\$

		a naturopath licensed under Washington law	
12. Saamiyada la Cashuuri karo & Aan la Cashuuri karin Taxable & Non-Taxable Bonds	\$	28. Sheeyada la tuuro ee qofka la qalo Ostomic items	\$
13. Ku guulaysiga Khamaarka Gambling Winnings	\$	29. Insuulinta aadamahu isticmaalo Insulin for human use	\$
14. Kaalmada Dad waynaha iyo Masruufka la helay Public Assistance and Alimony Received	\$	30. Qalabka sifaynta kelyaha Kidney dialysis devices	\$
15. Lacagta laga helo wadan kale Money received from another country	\$	31. Qalabka la daadiyo ee loo isticmaalo in lagu qaado dawooyinka wixii ah isticmaalka aadamaha Disposable devices used to deliver drugs for human use	\$
16. Lacagta uu shaqaysto qofka guriga la lihi Money earned by co-owner	\$	32. Ku habbaynta dakhliga (Foomka 1040 laynka 10-> Jadwalka 1 Qaybta II laynka 26) Adjustment to income (Form 1040 line 10-> Schedule 1 Part II line 26)	\$
Dakhliga sanadkii hore Wadar hoosaadka: Previous year Income Subtotal:	\$	Sanadkii Hore Wadarta Jarjarida: Previous Year Total Deductions:	\$
(Wadar hoosaadka Dakhligaaga – (laga jaray) wadarta jarjarida) = sanadkii hore WADARTA GO'AN EE DAKHLIGA (Your Income Subtotal – (minus) the total deductions) = previous year NET TOTAL INCOME			\$
*VA Dheefta Naafada (haku darin wadarta) *VA Disability Benefit (do not add to total)	\$		
*Lacagta laga helay xubnaha qoyska (haku darin wadarta) *Money received from family members (do not add total)	\$		

6- Caddaynta/Saxeexa: Certification/Signature:

Saxeexida foomkan, waxaan xaqiijinayaa inaan:


By signing this form, I confirm that I:

Ku dhawaaqayo si waafaqsan ciqaabta been ku dhaarashada in macluumaadka xidhmada codsigan ay run tahay oo dhammaystiran tahay. **Fahmayaana inay tahay masuuliyadayda** si loogu wargeliyo xafiiska Qiimeeyaha Degmadda King haddii aan beddelo dakhliga ama duruufaha oo ka reebid kasta lagu bixiyo dhexda macluumaad khalad ah oo hoos imanaya cashuurta saxda ah ee la qiimeeyay shantii sano ee u dambaysay, lagu daray ciqaabta 100%. **Codso lacag celin** hoosta shuruudaha RCW 84-69-020 ee cashuurada la bixiyay ama wax badan la bixiyay iyaddoo khalad ahayd, iyaddoon la ogsoonayn, ama aqoon la'aan ku saabsan ka reebida bixinta cashuuraha dhismaha runta ah ee waafaqsan RCW 84.36.381 dhexda 389.

Declare under penalty of perjury that the information in this application packet is true and complete. **Understand it is my responsibility** to notify the King County Assessor's office if I have a change in income or circumstances and that any exemption granted through erroneous information is subject to the correct tax being assessed for the last five years, plus a 100% penalty. **Request a refund** under the provisions of RCW 84-69-020 for taxes paid or overpaid as a result of mistake, inadvertence, or lack of knowledge regarding exemption from paying real property taxes pursuant to RCW 84.36.381 through 389.

Saxeexa codsadaha:
Signature of applicant

Taariikhda:
Date

 Haddii la saxeexo Wakiilashada (POA), koobiga POA saxeexan waa in la lifaaqa.
If signed by Power of Attorney (POA), a copy of a signed POA must be attached.

Dhokumentiga Loo baahan yahay iyo Tilmaamaha loogu talagalay buuxinta codsiga warqadda ah

Si dhamaystiran u buuxi qaybaha 1 ilaa 6 oo ku soo dar dukumeentiyada taageeraya codsigaaga si aad uga fogaato dib u dhac ku yimaada ka shaqeynta codsigaaga. Haddii aad qabto su'aalo, la xariir Xafiiska Qiimeeyaha King County (206) 296-3920 ama



Exemptions.Assessments@kingcounty.gov

- **Iimayl HAKU soo dirin dukumeentiyadaada.** Sababo amni awgood, waa inaadan iimayl ahaan u soo dirin macluumaadkaga shakhsiyeed. Iimaylka waxaa lagu saleeyaa shuruudaha shaacinta dadwaynaha ee waafaqsan RCW 42.56.
- **Wax ka beddel dhammaan lambarada amniga bulshada iyo lambarada kootooyinka ku qoran dhokumentiyada la gudbiyay**

Qaybta 1 – Nooca Heerka Isbeddelka

Dooro dhammaan doorashooyinka ku habboon xaaladaada. Haddii aad u wareegayso dhisme cusub, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso codsiga buuxa oo dooro doorashada wareejinta. Sheeg midka uu yahay sanadka cashuurta dhismaha ay tani ku habboon tahay. Dhanka midig, sheeg sanadka cashuurta dhismaha ee heerkan isku beddelay. Dakhliga sanadka waxa uu ahaan doona sanadka hore ilaa sanadka cashuuraha dhismaha la filayo (Tusaale: heerka isbeddelke ee 2024 cashuurta dhismaha waxay u lahaan doontaa 2023 sidii dakhliga sanadka).

Qaybta 2 – Macluumaadka Codsadaha

Kula-kireystaha guriga waa qof kula nool oo kula leh gurigaaga.

- Haddii aad furtay ama aad si sharci ah u kala tagteen lamaanahaaga, fadlan ku soo dar nuqulka warqadda furriinka ama kala tagista sharciga ah.
- Haddii lamaanahaaga ama xaaskaaga ay dhimatay, fadlan bixi nuqulka cadeynta dhimashada.
- Haddii loo wareejinayo xaaska hadhay/lamaanaha guriga, bixi warqaddaha caddaynta ee caddaynta da'da (Aqoonsiga sawirka leh ee gobolka, Baasaboorka, ama Shahaadafa Dhalashada).

Lambarka xidhmada waa la heli karaa ogaysiiskaaga qiimaynta ee booskaadhka ama biilkaaga cashuurta dhismaha, ama la xidhiidhida xafiiskayaga. Haddii aad leedahay guri is-kaashato ah ama guri warwareega oo aadan haysan lambarkaaga baarselka, waxaad u baahan doontaa inaad soo wacdo ama aad iimayl u soo dirto xafiiskayaga si aad u hesho lambarka baarselka.

Qaybta 3 – Lahaanshaha Dhismaha & Ku jirida

Geli taariikhda aad iibsatay deegaanka/guriga iyo taariikhda aad bilawday inaad degto xittaa haddi taariikhahaas ay isku mid yihiin. Haddii aad xaq u yeelatay oo aad hore uga heshay ka-dhaafitaan degaansho oo Washington ah, muuji goorta iyo goobta.

- Haddii hantidaadu ay ku qoran tahay magaca Hay'ad, ka dib buuxi foomka Xaqiijinta Hay'ada, oo bixi qaybta dukumiintiyada Hay'ada sida la tilmaamay.
- Nuqulka Warqadda lahaanshaha guriga (haddii ay diyaar kuu tahay oo aad heli karto). Tani waxay na caawin doontaa haddii aad iibsatay gurigaaga kahor 1991.

Qaybta 4 – Dakhliga Soo hadha ee isku jira (CDI) Heerka

Fadlan dooro heerka dakhligaagu ku dhaco gudaha. Haddii aad ka badan tahay xadka dakhliga, fadlan dooro doorashadaada. Keliya buuxi qaybta lacag bixinta halka wakhti ah haddii ay la xidhiidho xaaladaada. Dooro haddii aad jeclaan lahayd in dheeraad ah dib u eegida dakhligaaga.

Qaybta 5 – Dakhliga iyo Kharashaadka

Sida loo xisaabiyo dakhliga guud

"Dakhliga guud" wuxuu leeyahay qeexid gaar ah oo loogu talagalay barnaamijkan. Si waafaqsan RCW 84.36.383(6), "dakhliga soo hadha" waxa lagu habboonaysiiyaa wadarta dakhliga sida lagu qeexay xeerka dakhliga gudaha ee federaalka, **lagu dfaray** dhammaan kuwa soo socda ee aan lagu darin, ama laga jaray wadarta dakhligaaga lagu habboonaysiiyay:

- Dakhliga rasamaalka ah, oo aan ka ahayn dakhliga iibka guriga aasaasiga ah oo dib loogu maalgeliyo guri kale oo cusub.
- Qiimaha laga jaray ee ah khasaaraha ama qiimo dhaca.
- Lacagaha hawlgabka iyo dakhliga sannadlaha ah.
- Gunnooyinka Sooshiyaal Sekuuritiga iyo Hawlgabka.
- Mushaharka ciidanka iyo faa'idooyinka aan ka aheyn daryeel-kula jooga iyo lacag-bixinta gargaarka caafimaadka.
- Mushharka iyo gunnooyinka ciidanka halyeeyda ah marka laga reebo daryeelka, lacag-bixinta gunnooyinka caafimaadka, gunnooyinka naafada ee VA ciidanka halyeeyda ah, iyo magdhawga ku tiirsanaanta DIC.
- Iyo faa'idooyinka laga helo maalgashiyada.
- Dulsarka laga helo maalgashiyada gobolka iyo degmada.

Dakhliyadan waxay ku jiraan "dakhliga guud" xitaa haddii aan loo canshuuri karin ujeedooyinka IRS.

* **Fiiro gaar ah:** Dhammaan qadarka laga jaray khasaaraha, ay ku jira Khasaaraha Raasamaalka, looma oggola in lagu daro bilowga macaashka wixii ah ujeedada barnaamijkan. Haddii si kale loo dhigo, dhammaan macaashka waa in dakhli loo tiriya, iyo khasaaraha looga fekeraa si waafaqsan RCW 84.36.383 (6.a-b).

Sida loo xisaabiyo dakhliga guud ee la isu geeyey:

Sida ku cad RCW 84.36.383(1) "dakhliga guud ee la isku geeyey" waa dakhligaaga guud oo lagu daray dakhliga guud ee lamaanahaaga guriga iyo qof kasta oo kula kireystay guriga, oo laga jaray kharashaadka ku baxa adiga iyo lamaanahaaga guriga.

Dakhliga iyo halka laga helayo (waafaqsan lambarada gudaha dakhliga/xaashida kharashka):

Haddii aad soo xarayso cashuurta, soo celintaadabuuxda ee cashuurta ayaa loogu baahan yahay xaqiijinta dakhliga.

1. Mushaharada la shaqaystay, Mushaharka, bakhshiiska: IRS Foomka 1040 laynka 1a. **Lifaaq W2s**
2. Sooshiyaal Sekuuritiga go'an: IRS Foomka 1040 laynka 6a. **Lifaaq Foomka SSA -1099**
3. Sooshiyaal Sekuuritiga Dakhliga Naafanimada: **SS Warqadda Abaal Marinta**
4. Hawlgabka, Macaashka Hawlgabka, Dakhligaga Qandaraaska caymiska: IRS Foomka 1040 Laynka 5a/5b (haddii 5a la buuxiyo, isticmaal lambarkaas, keliya hadd 5b la buuxiyay, isticmaal lambarkaas. **Lifaaq foomamka 1099-R**
5. IRA (Qadarka La cashuuri karo): IRS Foomka 1040 laynka 4b. **Lifaaq foomamka 1099-R**
6. Magdhowga Shaqo la'aanta: IRS Foomka 1040 Jadwalka 1-laynka 7. **Lifaaq jadwalka 1 iyo 1099-G**
7. Dulsarka Laga Qaado Canshuurta iyo Kan aan Laga Qaadin iyo/ama Macaash qaybsiga: IRS Foomka 1040 laymanka 2a, 2b, iyo 3b. **Lifaaq Foomka(mamka) 1099-INT iyo Foomka(mamka) 1099-DIV**
8. Dakhliga ganacsiga ka hor qiime dhaca: IRS Foomka 1040 Jadwalka 1-laynka 3. **Lifaaq Jadwalka 1 iyo C**
9. Wadarta Guud ee Raasumaalka. **HAKA jarin khasaaraha:** IRS Foomka 1040 laynka 7. **Lifaaq Jadwalka D ee qayb-qaybsan; haddi kale, lifaaq dhammaan boggaga la isku daray/isku jira 1099-B ee dhammaan qoraalada**
10. Dakhliga kirada ka hor qiime dhaca: IRS Foomka 1040 Jadwalka 1-laynka 5. **Lifaaq Jadwalka 1 iyo E**
11. Sanduuqa, shuraakada, Dakhliga laga helo Dhisme ama Alaab: IRS Foomka 1040 Jadwalka E. **Lifaaq Jadwalka E**
12. Saamiyada la Cashuuri karo iyo Aan la Cashuuri karin: IRS Foomka 1040 jadwalka D, Foomka: 8949. **Lifaaq 1099-B, Jadwalka E iyo Foomka 8949**

13. Ku guulaysiga Khamaarka: IRS Foomka 1040 Jadwalka 1-laynka 8b. Lifaaq Jadwalka 1 iyo Foomka W2-G
14. Kaalmada Dad waynaha iyo Masruufka la helay: Lifaaq Warbixinta Abaal marinta
15. Lacagta laga helo wadan kale: Lifaaq caddaynta dhokumentiyada dakhliga
16. Lacagta uu shaqaysto qofka guriga la lihi: Lifaaq koobiyada wax laga beddelay ee dhokumentiyadooda dakhliga

Waa maxay kharashyada la jari karo

Kharashyada aad bixiseen adiga ama lammaanagaaga guriga (aan dib loo celin ama caymiska uusan daboolin) ee lagu bixiyey waxyaabaha soo socda:

Kharashyada aan la celin/jarjarida:

17. Gelida guriga kalkaaliska, xarunta taakulada nolosha, ama kharashyada guriga qoyska qofka wayn ee lagu lahaa: Bixi koobiyada qaansheegaha la bixiyay ama dhokumentiyad ala mid ah ee qadarka la geliyay.
18. Geli kharashyada daryeelka caafimaadka guriga la galay. Daryeelka caafimaadka guriga macneheedu waa daawaynta ama daryeelka guriga lagu helo ee la mid ah nooca daryeelka lagu bixiyo habka caadiga ah ee daawaynta ama daryeelka guriga dadka waayeelka ah. Daryeel-bixiyeyaasha caafimaadka gurigu khasab ma aha inay shati u haystaan kharashka laga jarayo marka loo eego sharciga. Kharashka loo qalmo waxay noqon kartaa daawaynta jidhka lagu helay gudaha guriga, daawaynta caafimaadka ama daryeelka lagu helay gudaha guriga, daryeelka qofka, hawlaha guri hagaajinta fudud, cuntooyinka la qaybiyo, ama digniinta xaalad nolosha. Bixi koobiyada qaansheegaha la bixiyay ama dhokumentiyad ala mid ah ee qadarka la geliyay.
19. Geli qadarada la bixiyay ee dawo qorida. Bixi warbixinta dhammaadka sanadka ee farmasiigaaga muujinaya waxa aad bixisay ee ka baxsan jeebka dawo qorida aan la celin lacagta.
20. Geli qadarka lagu bixiyay Qaybaha Medicare A, B, C, ama D qadarada caymiska. Bixi koobiyada SSA-1099, qaan sheegta, ama dhokumentiyada la midka ah ee qadarka la geliyay.
21. Geli qadarka lagu bixiyo Medicare qadarka caymiska kaabida ay ansixiso. Keen koobiyada bayaanada tilmaamaya shirkada caymiska, lambarka qorshaha, iyo khidmadaha la bixiyay.
22. Geli qadarka lagu bixiyo qalabka caafimaadka adkaysiga leh, qalabka sare u qaadida dhaqaaqa, iyo qalabyada lagu xidho xubnaha sida lugaha. Lacagaha laga jari karo waxaa ka mid ah iibka, kiraynta, dayactirka, nadiifinta, qaybaha beddelka, iwm. Dib u eeg WAC 458-20-18801 jadwalada 1, 3 iyo 5 sheeyada loo qalmo. Bixi risiidhada ama qaansheegta qadarada la geliyay.
23. Geli qadarka lagu bixiyay caafimaad ahaan ogsajiinta la qoray, ay ku jirto laakiin kuma xadidna, nidaamka adkaynta ogsajiinta, nidaamka xoojinta ogsajiinta, nidaamyada ogsajiinta dareeraha ah, iyo neefta ah, nidaamyada ogsajiinta dhalada ku jirta ee la qoray. Bixi risiidhada ama qaansheegta la bixiyaya ee qadarada la geliyay.
24. Bixi qadarka la bixiyay ee lacagta caymiska daryeelka muddada dheer. Bixi qaansheegaha la bixiyay ama dhokumentiyad ala mid ah ee qadarka la geliyay.
25. Geli qadarka lagu bixiyo wadaagida kharashka. Qadarka wadaagista kharashka ay ku jirto jarjarida, caymiska wadaaga ah, kharashka la wada bixiyo dadka la diiwaan geliyo qorshaha caafimaadka; qadarka loo tiriyo dhanka qorshayaasha inta ugu badan ee jeebka ka baxsan. Keen koobabiga caymiska oo tilmaamaya cadadka ugu badan ee jeebkaaga laga bixiyey. Xaqiiji in magacaagu ku daabacan yahay.
26. Geli qadarka lagu bixiyay dawada la isku buufiyo; qalabka, aan ahayn alaabta dhismaha, oo u beddesha dawada dareeraha uumi markaas waa la nuugi karaa. Bixi risiidhada ama qaansheegta la bixiyaya ee qadarada la geliyay.
27. Geli qadarka la bixiyay ee dawooyinka macdanta ah, xawayaanka iyo asalka dhirta ah kuwa ah ee la qoray, la maamulay, lagu bixiyay nidaamka aan dawada ahayn ee waafaqsan sharciga Washington. Bixi risiidhada ama qaansheegta la bixiyaya ee qadarada la geliyay. Ku dar koobiga qorshaha daawaynta, iyo magaca nidaamka aan dawada ahayn iyo lambarkooda ruqsada Washington.

28. Geli qadarka lacagta la bixiyo sheeyada qofka la dawaynayo: saadka caafimaadka ee la tuuro isticmaal ka dib oo loo isticmaalay qaliinka xidmaha, daloolka xidmaha, iyo qaliinka bukaanka ee daloolinta uur ku jirta, oo waxaa ku jira kiishashka, suunta si loo qaado kiishashka, xabagta, tuumbooyinka, xabadhka meel lagu dhejiyo, carfiyaha, saabuunta, jelka, kiriiinka, dawada dilida jeermiska, iyo saadadka kale ee la midka ah. *Haku darin nigisyada, gooska iyo xejinta si loo ilaaliyo nigisyada, isboonyada ama rabadhka ballaadhan.* **Bixi risiidhada ama qaansheegta aqoonsanaysa sheeyada iyo qadarka lagu bixiyay.**
29. Geli qadarka lagu bixiyay insuulinka isticmaalka aadamaha ah. **Bixi risiidhada ama qaansheegta aqoonsanaysa sheeyada iyo qadarka lagu bixiyay.**
30. Geli qadarka lagu bixiyay dhaqida kelyaha. **Bixi risiidhada ama qaansheegta aqoonsanaysa sheeyada iyo qadarka lagu bixiyay.**
31. Geli qadarka lagu bixiyaya qalabyada marka la isticmaalo la tuuro ee loo isticmaalo si loogu bixiyo dawooyinka sida siriijka, tuumbada, ama katiitarka. Haku darin aada ama qalab haysa tuumbada ama katiitarka. **Bixi risiidhada ama qaansheegta aqoonsanaysa sheeyada iyo qadarka lagu bixiyay.**
32. Ku habbaynta dakhliga. Tixraac ku sameey Foomka Federaalka 1040 sadarka 10. Lacagtani waa inay ka socotaa Jadwalka 1 ee foomkaaga 1040, Qaybta II ee sadarka 26. **Bixi koobiga kaaga dhammayska tiran ee 1040, ay ku jirto Jadwalka 1.**

Dakhliga Dheeraadka ah si looga Warbixiyo - Macluumaadkan waxaa loogu baahan yahay in la bixiyay siidii lacagta dakhliga laakiin looma tiriyo sidii ay ku lid tahay tirada dakhliga la isku daray ee soo hadhay.

33. VA Naafanimada Benefit: **Lifaaq Warqadda Abaal marinta VA**
34. Lacagta laga helay Qoyska: **Lifaaq warqadda ama warbixinta ka timid xubinta qoyska**

Qaybta 8 – Caddaynta/Saxeexa(loo baahan yahay)

Saxiix oo taariikhda ku qor codsiga. Waxaad saxiixaysaa adigoo ku dhaaranaya, inaad ogtahay in dhammaan macluumaadka uu yahay mid run ah oo sax ah. Waxaad fahansan tahay inay masuuliyadaada tahay inaad ogaysiiso xafiiska qiimaynta degmada haddii ay wax ka bedelaan heerka dakhligaaga ama lahaanshahaaga guriga (ama deganaanshaha). Wakiilada qofka waa lagu saxeexi karaa laakiin caddaynta POA waa in lagu lifaaqaa. *Codsigaaga ma habbayn doono saxeex la'aan codsadaha ama kooxda ku habboon.*

Caddaynta Dheeraadka ah

Warqadda caddaynta dheeraadka ah waa la codsan karaa si loo taageero codsigaaga oo waxaa lagu codsan doonaa qoraal ahaan haddii xafiiska Qiimeeyahu u arko in caddayntan ay lama hiraan tahay, si waafaqsan WAC 458-16A-135. Marka warqadda caddaynta la codsado, codsadaha waxa uu haystaa 30 maalmood daaqada lagu soo gudbinayo warqadda caddaynta laga bilaabo taariikhda warqadda codsiga. Haddii warqadda caddaynta ah aan la gudbin gudaha wakhtiga loo baahan yahay, codsiga waxaa lagu diidi karaa si waafaqsan RCW 84.36.

Ciwaankee ayaan ku dirayaa codsigayga iyo/ama dukumiintiyadayda?

Department of Assessments
ATTN: Senior Exemptions
KSC – AS – 0708
201 S. Jackson St.
Seattle, WA 98104



Fadlan xusuuso inaad qorto **xidhmadaada** lambarkeeda iyo **sanadka cashuurta dhismaha** ku qoran

dhokumentiyadaada.

Maxaa dhacaaya kadib marka aan diri codsigayga?

Marka aan helno codsigaaga, waxaan kuu soo diri doonaa warqad (boostada codsiyada) ama iimaylka (codsiyada webka) oo xaqiijinaysa inaan helay codsigaaga. Haddii aad ku heli waydo xaqiijintan muddo lix (6) usbuuc ah

gudahood markaad codsigaga gudbisay, fadlan nala soo xiriir.




Marka aanu billowno inaanu dib u eegista codsigaga oo aanu ogaano in macluumaad uu ka maqan yahay waxaan:

1. kusoo diri doonaa iimayl aan kaaga codsanayso inaad soo buuxiso xogta maqan (aadna kusoo dirto ciwaanka iimaylka loo adeegsaday codsiga oonleenka). Waxaa lagaa codsan doonaa inaad khadka soo geliso macluumaadka lagaa codsaday AMA waxaad iimayl ahaan u soo diri kartaa nuqulka dukumeentiyada adigoo u diraya xafiiskayaga adigoo soo raacinaya nuqulka warqadda macluumaadka dheeraadka ah.

AMA

2. waxaan warqad kuugu soo diri doonaa boosto (haddii aad codsatay adoo adeegsanaaya codsiga warqada). Waxaad u baahan doontaa inaad boosta ugu dirto koobiga wax laga beddelay xafiiskayaga oo ay la socoto koobiga warqadda macluumaadka dheeraadka ah ee aanu boosta ku soo dirnay.

Su'aalo ma qabtaa?

	Booqo websaydkayaga https://www.kingcounty.gov/depts/assessor/TaxRelief.aspx .
	Nala soo xidhiidh Isniin ilaa Jimce laga bilaabo 8:30 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo laga reebo fasaxyada iyaddoo la marayo lambarka telefoonka iyo cinwaanka iimaylka xaga hoose ee bogga.
	Booqo Xarunta Adeegeena Macaamiisha ee kutaala dabaqa 2 ^{aad} ee King Street Center dhismahu waxa uu furan yahay Isniin ilaa Jimco 8:30 subaxnimo 4:30 galabnimo laga reebo fasaxyada.

Waxaa jira sanduuq sugan ah oo hor yaala dhismaheena oo ku yaala 201 S. Jackson St., Seattle, WA 98104—kaarka ogeysiiska ee bokiska wax lagu rido waxaa ku qoran “Sanduuqa Wax lagu rido ee Xafiiska Qiimeeyaha King County”. Bogoska warqaddaha lagu rido waa uu furan yahay muddada saacadaha shaqada xarunta adeega macmiilka.